



Orientation to Ontario

RUQSADA DARAWALKA E ONTARIO

Si aad gaari ugu wado Ontario, waa inaad haysataa ruqsada darawalka ee Ontario. 60 maalmood ee ugu horeeya kadib marka aad wadanka soo gasho, waxaad adeegsan kartaa ruqsadaada aad kala timid wadan kale. Intaas kadib, waa qasab inaad lahaato ruqsadaada shaqsiga ah ee Ontario. Ragga iyo dumarka aaya codsan kara waana inay:

- jiraa 16 sano.
- maraan imtaxaan qoraal ah—oo lagu heli karo luuqado badan.
- waa inay maraan baaritaanka araga iyo 2 imtaxaannada gaari wadista ah.

Heerarka Kaladuwan ee Ruqsadaha Darawalnimada

- Heerka G - gaariyaasha, caasiyada, iyo taragaayada yaryar:
- Heerka M - mootooyinka.
- Heerka ganacsiga (A ilaa E) - taraagyada waawayn iyo basaska.

Nidaamka Heerka Sare ee Ruqsada Ontario

Waa inaad haysato ruqsada ku meel gaarka ah muddo 2 sano ah kahor intaadan helin ruqsadaada buuxda.

- G1 -darwallada cusub ee keliya gaari wadi kara marka uu gaariga la saaran yahay darawal kale oo ruqsad leh. Waxaad mudaysan kartaa imtaxaanka G2 kadib 12 bilood, haddii aad qaadatana koorsada badqabka gaari wadista, waxaad codsan kartaa 8 bilood kadib.
- G2 - darwallada ku jira mudada tijaabada ee keligood gaariga wadan kara ayadoo lagu xirayao xadidaado

gaar ah. Darwallada G2 waa inay galaan imtaxaanka darawalka ee G kadib marka ay gaari wadista u bartaan si iskood ah

- G - ruqsada buuxda iyo darwallada ayaan lahayn wax xadidaado ah umana baahna inay maraan wax imtaxaanno dheeri ah.

Haddii aad ruqsad darawal oo sharci ah ka wadato wadan kale, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad ku badelato ruqsada buuxda ee G ama inaad u buudo heerka G1 ama G2.

- Xog Badan ka ogoow Isku badelashada Ruqsada iyo Codsiyada Ruqsada Shishieeye DriveTest drivetest.ca

DUKUMIINTIYADA LAGAA RABO

- Keen 1 cadayn aqoonsi (ID)oo uu ku qoran yahay magacaaga sharciga ah, taariikhda dhalashada iyo saxiix.
- Aqoonsigaagu waa inuu yahay dukumiinti rasmi ah, uusana ahayn koobi. Waa inay ku qoran tahay Ingiriis ama Faransiis.
- Ka ogoow Dukumiintiyada Aqoonsi ahaan loo Aqbali karo DriveTest drivetest.ca

XARUNTA DRIVETEST

Si aad u codsato ruqsad, booqo Xarunta DriveTest adoo sita dukumiintiga lagaa rabo.

Ruqsada G, waa inaad samaysaa waxyaabaha soo socda:

- Waa inaad gashaa imtaxaanka aqoonta ee qoran - ma lahan waqti u cayiman waxaana lagu heli karaa 20 luuqadood ama waxaad soo kaxaysan kartaa turjumaan khibrad leh si uu kuu caawiyo.



1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

- Haddii aad ku baasto imtaxaanka qoraalka ah, waxaad mari doontaa imtaxaanka aragga.
- Haddii aad ku baasto imtaxaanka aragga, waxaa lagaa qaadayaa sawir.
- Waxaad helaysaa ruqsada ku meel gaarka ah ee G isla markaba kaarkaaga sawirka leh ee ruqsada Darawalka ayaana laguugu soo diri doonaa boostada.
- Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka, waa inaad bixisaa qarashka aadna markale gashaa.

Si aad u hesho ruqsada G2 ama G, waa inaad imtaxaanka wadada ka mudaysataa webseedka xarunta DriveTest.

- Soo daabac iimeelka xaqiijinta ah soona qaado adoo soo raacinaaya aqoonsigaaga si aad u tagto Xarunta DriveTest.
- La imoow gaari. Xarunta DriveTest ka bixiso gaariyaal lagu galo imatxaanka. Waxaad soo caariyaysan kartaa gaar ama waxaad ka kireysan kartaa dugsigaaga gaari wadista.
- Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka wadada, waa inaad mudaysataa mid kale.
- Kadib marka aad ku baasto G2, waa inaad sugtaa 12 bilood kahor intaadan gelin imtaxaan kale.
- Kadib marka aad ku baasto imtaxaanka wadada, waxaad helaysaa ruqsada ku meel gaarka ah isla markaba kaarkaaga sawirka leh ee ruqsada Darawalka ayaana laguugu soo diri doonaa boostada.

U DIYAAR GAROOWGA IMTAXAANADAADA DARAWALNIMADA

Akhri Buug Gacmeedka Darawalka ee Rasmiga ah ee MT, oo aad ka iibsan karto oonlaynka ama aad ka akhrin karto oonlaynka.

Dugsiyada darawalnimada ayaa baxsha casharada fasalka iyo casharada barashada wadista gaariga. Haddii aad qaadata koorsada darawalnimada, waxaad dhiibi kartaa qiimeyaasha hooseeya ee canshuurta.

